



## **Xafiiska Qarammada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)**

### **WAR-SAXAAFADEED 002/2009**

#### **ERGAYGGA GAARKA AH EE QARAMMADA MIDOOBAY AYAA UGU BAAQAY SOOMAALIDU IN AY LABAN-LAABTO DADAALKOODA KU AADAN NABADDA KA-DIB MARKII ITOOBIYA AY WANDANKA KA BAXDO**

Nayroobi, 13 Janaayo 2009 - Ergaygga Gaarka ah ee Qarammadda Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Soomaaliya, Ahmedou Ould-Abdullah ayaa yiri, bacdama ciidamada Itoobiya ay ka baxeen Muqdisho, arrintu markaan waxay ku xiran tahay Soomaalidu, si ay u xaqiijiyaan nabadda iyo xasiloonida wadankooda.

“Itoobiyaanku waxay warqad u qoreen Xog-hayaha Guud ee Qarammadda Midoobay bishii Nofeember ee sanadkii tegay, ayaga oo sheegay in ay baxayaan”, ayuu yiri Mudane Ould-Abdullah. “Maanteyto Itoobiyaanku waxay fuliyeen go’aankoodi. Hadaba, kubaddu waxay ku jirta gacanta dadka Soomaaliyeed, gaar ahaan kii lahaa anigu waxa kaliya oo la dagaalameyno waa ciidamada Itoobiya, hadaba kuwaasu waa in ay joojiyaan isdilka iyo iyo deganaasha la’aanta macno darada ah” .

Mudane Ould-Abdullah waxa kale ee ku nuuxnuusaday muhimada ay leedahay in la doorto Madaxweyne cusub isla mudada ku-cad Axdiga Federaaliga ee Ku-meel Gaarka ah ee uu wadanku leeyahay.

Baarlamaanka hadda jira aya mar hore mabda’ ahaan ogolaaday in la balaariyo baarlamaanka iyo abuuritaanka Dawlad Midnimo Qaran leh. Sidaas darteed, kooxda hawlgalka ee Guddigga Heerka Sare oo kooban wakiilo ka socda Dawlada Federaalka Ku-meel Gaarka ah iyo Isbaheysiga Dib-Uureynta Soomaaliya aya ku heshiiyey talo soo jeedin ku aadan balaarinta baarlamaanka, sida uu qabo Axdiga Ku-meel Gaarka ah, iyo in baarlamaankii la baraaliyey uu ku doorto Madaxweyne Jabuuti dhamaadka Bishaan. Talo soo jeedintaa waxaa loo gudbin doona shir uu Jabuuti ku yeelan doono Guddiga Heerka Sare usbuucaan- 15-16ka January 2009.

Talo soo jeedinto waxaa loo gudbin doono Guddiga Heerka Sare si loo ansixiyo ayuu yiri Ould-Abdullah. “Waxaan rejeynayaa in baarlamaanku u hawl geli doono si biseyl iyo mas’uuliyad ku dheehan tahay isla markaana loo xaqiijiyo doorashada madaxweyne watigii loogu tala galay, iyo in ku-simaha madaxweyneaha, isla markaasna ah Afhayeanka baarlamaanka, Sheikh Aden Mohamed Nur ‘Madoobe’ in uu ka soo geybgalo wadahadalka ka dib marka uu ka soo noqdo safarka rasmiga ah ee ku tegayo dalka Kuwait”.

---

Wixii war dheeraad ah fadlan la xiriir: Susannah Price / Donna Cusumano,  
Public Information Officers, UN Political Office for Somalia (Nairobi, Kenya)

Tel: +254 20 762 7132 / 7133 or +254 733902020 / 737400133

Fadlan booqo: [www.UN-Somalia.org](http://www.UN-Somalia.org)

Mudane Ould-Abdullah ayaa sheegay in dad-badan oo Soomaaliyeed ay ku guubaa-biyeen in la xaqiijiyo doorashada Madaxweyne cusub in ay ku qabsoonto 30 cisho gudohhod sida ku-cad Axdiga Ku-meel Gaarka ah ee Federaalka, waxaana la jecel yahay in baarlamaanka la baraaliyey uu doorto madaxweynaha.

“Maanta Soomaaliya waxay u baahan tahay, isla markaasna ay mudan tahay in hesho dawlad tayo leh, taas oo wakiil ah ummadda, lehna ka soo qeybgal aad u balaaran, gaar ahaan dhinaca jiilka cusub ee rag iyo haween-ba leh, kuwaas oo magacoodu usan ku wasaqoobin dagaaladii dalka ka dhacay, musuqmaasuq iyo udaacad ahaansho qabiil ee said ah” ayu yiri Ould Abdullah. “waxaan ugu baaqeyna dhammaan dadka Soomaaliyeed oo heysta taageerada bulshada caalamka, in ay sii wadaan taageeridooda ku aadan geedi socoda nabada Jabuuti, isu-guna geeyaan dadaalkooda si ay u dooran lahayeen madaxweyne leh karti, waxqabad iyo hogaamin-ba, kaas oo kari kara in si hoose ula shaqeeyo Afhayeenka baarlamaanka iyo kuwa kaleetaba si loo sameeyo dawlad midnimo Qaran leh, usbuucayada dhow.

“Dawladda midnimada qaran leh waa in ahaato mid wax ka qaban karta arrimaha nabadgelyada ka dib markii ay ciidamad Itoobiya ay wadanka ka baxaan, taas oo si hoose ula shaqeyn doono ciidamada wadajirka ah ee arrimmaha nabadgelyada, AMISOM. Waxaa kale oo rejeyneyna in ay dawladaani u hor-seedi doonto Soomaaliy mustaq-bal ay nabadi ku dheehan tahay”.